

PATIENT EDUCATION

Qubayska CHG ee Qalliinka Ka Hor: OB

Chlorhexidine Gluconate (CHG) waxay dishaa jeermiska waxaanay ku jirtaa noocyada saabuunta qaarkood. Ku dhaqista maqaarkaaga saabuun jeermis-dile ah waxay gacan ka geysan doontaa joojinta caabuqa qalliinka ka dib. Ku qubeyso saabuunta CHG habeenka qalliinka ka horreeya IYO subaxda qalliinka adigoo raacaya tallaabooyinka ku yaala warqadan.

- Hoos waxaa ku yaala sawirada qaar ka mid ah saabuunta CHG. Nooc kasta/summad kasta oo ka kooban **4% CHG** waa CAADI in la isticmaalo. Weydii farmasiilaha haddii aanad garanayn wax aad iibsato ama haddii aad su'aalo qabto. **HA isticmaalin alaabtan haddii aad xasaasiyad ka qaado CHG.**




- libso laba dhalo oo 4-wiqiyadood ah (ama iibso hal dhalo oo 8-wiqiyadood ah oo isticmaal kala badh qubays kasta).
- HA XIIRIN qeyb ka mid ah jidhka laba maalmood ka hor qalliinka.. Raggu way xiiri karaan wejiga laba maalmood ka hor.
- Saabuuntani way wasakhayn kartaa ama baddeli kartaa midabka tuwaalada/marada-dhaqashada.

Habeenka ka horeeya qalliinka

1. **HA MARIN SAABUUNTA CHG indhahaaga, dhegahaaga, afkaaga ama lugahaaga dhexdooda xubnaha taranka ee dumarka ama ragga.**
2. Tuushka/sinxiga qubeysiga, marka hore jirkaaga ku nadiifi saabuun caadi ah. Dhaq oo biyo raaci timahaaga adoo isticmaalaya shaambooga caadiga ah.
3. Xaqiiji inaad isticmaasho biyo nadiif ah si aad u xaleyso dhammaan saabuunta, shaambooga, iyo koonddhiishanerka jirkaaga iyo timahaaga.
4. Marka xigta isticmaal biyo nadiif ah si aad u qoyso jirkaaga oo dhan. Kadibna dami biyaha ama ka fogow buufinta biyaha.
5. Ka fogow biyaha inta aad ku qubeysanayso saabuunta CHG.
6. Icticmaal hal dhalo (4 wiqiyadood) qubeyskan (ama kala badh dhalada 8da-wiqiyadood ah).

SII WAD TILMAAMAHA KU YAALA BOGGA LABAAD

7. Isticmaal marada-dhaqista oo nadiif ah si aad jirkaaga uga saarto saabuunta CHG. Ku bilow inaad dhaqdo qoorta oo nadiifi qeyb kasta oo jirkaaga ka mid ah adigoo u wadaya dhanka cagahaaga. **HA MARIN SAABUUNTA CHG indhahaaga, dhegahaaga, afkaaga ama lugahaaga dhexdooda siilka ama guska. HA ISTICMAALIN CHG maqaarka jirka, oo furan ama nabaro leh.**
 - o Marka aad dhammayso nadiifinta jirkaaga, **si tartiib ah u xoq meesha qalliinka lagu sameyn doono ilaa 3 daqiiqo.** Fiiri calaamadda ku taala sawirka hoose ee mee(sha/laha) la jeexi doono.



8. Isticmaal biyo nadiif ah si aad jirkaaga uga tirtirto dhammaan saabuunta CHG.
9. Haddii aad leedahay xanuun, baro guduudan ama cuncun aan joogsanayn, isticmaal biyo nadiif ah si aad isla markaaba iskaga biyo raaciso saabuunta CHG oo ha marin mar dambe.
10. HA KU DHAQAN saabuunta caadiga ah, shaamboo, ama koondhiishanerka ka dib marka aad isticmaasho saabuunta CHG.
11. Isticmaal shukumaan nadiif ah (shukumaan aan la isticmaalin tan iyo markii la dhaqay) si aad jirkaaga u engejiso.
12. HA MARSAN carfiyeyaasha, looshinada, kareemyada, budada mayk-abka, ama buufinta.
13. Xidho dhar nadiif ah (dhar aan la xidhan tan iyo markii la dhaqay).
14. Ku seexo go'yaal nadiif ah (go'yaal aan lagu seexan ama aan la isticmaalin tan iyo markii la dhaqay).

Subaxda qalliinka

1. **Kaliya isticmaal saabuunta CHG qubeysigan. HA ISTICMAALIN CHG wajiga (indhaha, dhagaha, afka), agagaarka xubinta taranka ninka iyo qabadha. HA ISTICMAALIN CHG maqaarka jirka, oo furan ama nabaro leh.**
2. HA marsan shaamboo ama koondhiishaner timahaaga qubeysigan.
3. isticmaal biyo nadiif ah si aad u qoyso jirkaaga oo dhan. Kadibna dami biyaha ama ka fogow buufinta biyaha.
4. Ka fogow biyaha inta aad ku qubeysanayso saabuunta CHG.
5. Isticmaal hal dhalo (4 wiqiyadood) qubeyskan (ama kala badh dhalada 8da-wiqiyadood ah).
6. Isticmaal marada-dhaqista oo nadiif ah si aad jirkaaga uga saarto saabuunta CHG. Ku bilow inaad dhaqdo qoorta oo nadiifi qeyb kasta oo jirkaaga ka mid ah adigoo u wadaya dhanka cagahaaga. **HA MARIN saabuunta CHG agagaarka indhahaaga, dhegahaaga, afkaaga ama lugahaaga dhexdooda siilka ama guska. HA ISTICMAALIN CHG maqaarka jirka oo furan, nabaro ama finan leh**
 - o Marka aad dhammayso nadiifinta jirkaaga, **si tartiib ah u xoq meesha qalliinka lagu sameyn doono ilaa 3 daqiiqo. Tani waa isla meeshii aad nadiifisay habeen hore (meesha la jeexi doono qalliinkaaga ee ku taala sawirka kore).**
7. Isticmaal biyo nadiif ah si aad jirkaaga uga tirtirto dhammaan saabuunta CHG.
8. Isticmaal shukumaan nadiif ah (shukumaan aan la isticmaalin tan iyo markii la dhaqay) si aad jirkaaga u engejiso.
9. HA MARSAN carfiyeyaasha, looshinada, kareemyada, budada mayk-abka, ama buufinta.
10. Xidho dhar nadiif ah (dhar aan la xidhan tan iyo markii la dhaqay).

Wac rugta caafimaadka dhakhtarkaaga haddii aad wax su'aalo ah ka qabto qubeysiga qalliinka ka hor.